# Xaqiijinta Tasdiiqaha

Waa maxay Tasdiiqe?

Tasdiiquhu waa qof shahaado u heysta xaqiijinta sixiixa sarkaal dawladeed ahaan ama nootaayo dadweyne ku sameeya dukumeenti si loogu isticmaalo waddan kale. Tasdiiquhu wuxuu caddeeyaa:

- sax ahaanshaha sixiixa masu'uula idman ee saxeexay dukumintiga,
- awooda uu masuulkaas ku shaqaynayo, iyo
- marka ay ku habboon tahay, aqoonsiga sumada ama shaambada dukumeentigu muujinayo, tusaale ahaan, sumada nootaayada dadweynaha.

## Sida loo Noqdaa Tasdiiqe

Waxaa jira laba siyaabood oo lagu heli karo noqoshada Tasdiiqe Minnesota gudaheeda:

**Shaqsi ahaan in aad tago (Ballan inaad dhigato)**

Dukumeentiga la xaqiijiyay iyo/ama dukumeentiyada asalka ah oo nootayo la marsiiyay waa in aad la timaadaa ballantaada. Ogow: Anagu ma sameyno adeegyada nootaayo sameynta.

Waxaad ballan ku qabsan kartaa adiga oo isticmaalaya borogoraamka Microsoft Bookings: Ballan qabso. Ogow: Ballamaha waxa la heli karaa afar iyo toban maalmood ka hor.

Khidmadaha iyo Lacag Bixinta La Aqbali karo:

- Xafiisku wuxuu shahaado kasta oo tasdiiqid ah ka qaadaa $5.00 oo khidmad ah.
- Lacag bixinta la aqbali karo: Kaarka deynta, kaarka koontada jeegagga, lacag caddaan ah, jeeg ama jeega lacagta horay loo qadimay (money order).

Balamuhu waxay ka dhacaan cinwaanka ah:

Minnesota Secretary of State

First National Bank Building

332 Minnesota Street, Suite N201

Saint Paul, MN 55101

**Boosto Ahaan**

Haddii aad codsigaaga ku dirto boostada, waa inaad soo raacsiisaa dukumeentiga(dukumintiyada) shahaadaysan iyo/ama dukumeenti(yada) asalka ah ah ee la soo marsiiyay nootaayo, khidmadda lacagta arjiga, iyo foomka Codsiga Xaqiijinta oo buuxsan.

Dukumeentiyada waxaa dib loogu soo jawaabayaa ciwaanka ku qoran Foomka Codsiga Xaqiijinta (Authentication Request Form) marka laga reebo hadii aad bixiso tilmaamo gaar ah oo laguugu soo diro ciwaan kale ama aad soo raacsiiso baqshad leh cinwaanka dib laguugu soo diraayo.

Ogow: Waxaad soo raacsiin kartaa baqsahad lacagteedii horay loo bixiyay oo ah FedEx, USPS Priority Mail ama UPS haddii aad rabto inaad isticmaasho adeegga raadraaca leh ee boostada. Haddii aadan soo raacsiin adeegyada lacagta la hor bixiyay, xafiiskeenu wuxuu dukumeentiyadaada kuugu soo diri doonaa boostada caadiga ah ee Adeegga Boostada Mareykanka (U.S. Postal Service) si lacag la'aan ah oo aan lahay adeegyada raadraaca.

Khidmadaha iyo Lacag Bixinta La Aqbali karo:

- Xafiisku wuxuu shahaado kasta oo tasdiiqid ah ka qaadaa $5.00 oo khidmad ah.
- Lacag bixinta la aqbali karo: Jeegga caadiga ah ama jeega lacagta horay loo qadimay (money order) oo lagu qorayo MN Secretary of State

Cinwaanka Boostada:

Minnesota Secretary of State

First National Bank Building

332 Minnesota Street, Suite N201

Saint Paul, MN 55101

**Hagaha Dukumentiga Tasdiiqaha**

***Dukumentiyada asalka ah ee la cadeeyay*** uma baahna nootaayo. Noocyada dukumeentiyada waxaa ka mid ah:

- **Shahaadooyinka dhalashada iyo shahaadooyinka dhimashada waxaa xaqiijisa Waaxda Caafimaadka ee Minnesota.** Haddii aad u baahan tahay inaad Minnesota ka hesho koobiga dhalasho ama geeri la xaqiijiyay waxaad la xiriiri kartaa **Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah ee Waaxda Caafimaadka Minnesota (The Office of Vital Records at the Minnesota Department of Health)**.
- **Shahaadada guurka ama shatiyada ay cadeeyeen gobolka Minnesota.** Diiwaanada guurku waxay ku jiraan faylka xafiiska degmada shahaadada guurka laga soo saaray. IHaddii aad u baahan tahay inaad Minnesota ka hesho nuqul shahaadeysan oo shahaado guur ah, waxaad la xiriiri kartaa degmada laga xareeyay, ama waxaad ka hubisaa **Shahaadooyinka Guurka (Marriage Certificates)**.
- **Nuqulada la xaqiijiyay ee ah go'aanka furiinka, iyo xukunnada.** Nuqulladan shahaadaysan waxaa laga heli karaa degmada dacwaddu ka dhacday. Nuqulladan shahaadaysan waa la heli karaa **halkaan**.

- **Nuqullo shahaado ah oo dukumeenti ururka ganacsiga ah oo ku jira faylka Xoghayaha Dawladda ee Minnesota (Minnesota Secretary of State).** Nuqulladan shahaadaysan waa la heli karaa **halkaan**.

***Dukumintiyada u baahan nootaayo sax ah oo ka timid Notaayo dadweyne oo ah Minnesota.*** Noocyada dukumeentiyada waxaa ka mid ah:

- **Dukumentiyada gaarka ah (Tusaale, Waraaqaha korsashada ilmaha, Dhaarta, Awoodda Qareenka, iwm..)**

Dukumeentiyada gaarka ah waa in ay nootaayeeyaan Notaayo Dadweyne oo ah Minnesota.

- **Taranskiribtiyada ka yimin Kulliyadaha Gobolka Minnesota/Jaamacadda/Dugsiyada K-12 [hoose - sare])**

Taranskiribtiyada ay ku saxiixan yihiin sarkaalka dugsiga iyo shaabadda dugsiga ee uu saaray diiwaan-hayaha dugsigu lama aqbali karo. Taranskiribtiyada waa in ay nootaayo laga soo saaraa Notaayada Dadweynaha ee Minnesota.

**FIIRO GAAR AH:** Haddii qoraallada lagu soo bandhigo baqshad xiran oo uu dugsigu leeyahay, Xoghayaha Dawladda ee Minnesota waa in uu furo baqshadda si uu u eego in Taranskiribtiga ay nootaayeysan tahay.

- **Shahaada Waxbarashada Gobolka Minnesota Kulliyada/Jaamacada/Dugsiyada K-12**

Dibloomada uu ku saxiixan yahay sarkaalka iskuulka iyo shaabadda iskuulka oo uu saaray diiwaan-hayaha dugsiga lama aqbalayo. Dibloomada waa in ay nootaayiyeeyaan Notaayada Dadweynaha ee Minnesota..

**FIIRO GAAR AH:** Waa in aad ka hubisaa waddanka wax lagu siinayo si aad u go'aamiso in ay dibloomadu tahay tii asalka ahayd ama haddii nuqulka la aqbali karo. Dukuntiga asalka ah iyo/ama kan koobiga ah waa in si sax ah loo nootaayo.

***Si loo yareeyo fursadaha dukumeentiyada nootaayada loo diido, waxyaalahaan soo socda ayaa ah shuruudaha lagu helo nootaayo-siinta saxda ah.***

- ***Nootaayeynta saxda ah.*** Sida uu qabo Xeerka Minnesota 358.65 (**link (isku xiraha)**), the *Certificate of Notarial Act (nootaayeynta*) waa in ay ahaataa Ingiriis, waana in ay la socoto dukumeentiga ama ku lifaaqan tahay dukumeentiga, oo ay isla markaana ku jiraan waxyaalahaan soo socda:
    - Xukunka meesha ay nootaayaddu ka dhacday (tusaale, Degmada Ramsey, Gobolka Minnesota)
    - Ogaysiis qirasho/notarial ah (tusaale, saxeex goob joog ka ahaa, nuqul run ah oo sax ah, dhaar, iwm.)
    - Ciwaanka (tusaale ahaan, waa in lagu sheegaa sida Nootaayo Dadweye [Notary Public])
    - Taariikhda dukumeentiga la nootaayeeyay

    - Saxeexa nootaayada dadweynaha
    - Shaabada nootaayada dadweynaha

  *Tusaaleyaal la daabacan karo ee Shahaadada Sharciga Notarial (nootaayeynta*) ayaa halkaan hoose lagugu siiyay:

    - **Sixiixa Cadaynta (Attestation of a Signature [PDF])**
    - **Cadaynta Dukumintiga (Attestation of a Document [PDF])**
    - **Aqoonsiga Awoodda Qofka (Acknowledgment in Individual Capacity [PDF])**
    - **Aqoonsiga Awoodda Wakiilada (Acknowledgment in Representative Capacity [PDF])**
    - **Xaqiijinta Dhaarta (Verification Upon Oath [PDF])**

- ***Guddiga Nootaayada ee Minnesota oo ansax ah/Shabadda Nootaayada.*** Nootaayooyinka Dadweynaha waa in ay lahaadaan shuruudaha soo socda si ay awood ugu yeeshaan in ay nootaayo u saaraan dukumeentigaaga:
    - Waa in aysan nootaayadoodu shaqeyneyso (aysan dhacsaneyn) wakhtiga nootaayeynta.
    - Magaca qofka nootaayada ah sida uu ugu qoran yahay shaambada nootaayuhu waa inuu la mid yahay magaca guddiga nootaayada ugu qoran.
    - Taariikhda dhicitaanka ee shaambada nootaaygu waa inay la mid tahay taariikhda uu dhacayo kan guddiga nootaayada u qoran. *Marka laga reebo:* Shaabada nootaayada waxaa laga yaabaa in la isticmaalo ilaa taariikhda uu dhacayo, in kasta oo nootaahu si sax ah u cusboonaysiiyay muddo shan sano ah oo dheeraad ah.

Si loo go'aamiyo in nootaayuhu weli shaqaynayo iyo sida uu u qoran yahay magacooda iyo taariikhda uu dhacayo ka raadi **database ka nootaayada.** Haddii aadan hubin, fadlan nagala soo xiriir iimeylka **apostille.oss@state.mn.us**

**Fadlan ogow: Kani maaha liis dhamaystiran oo ah dukumeenti ah oo u qalma tasdiiqe oo keliya.**

## Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Tasdiiqaha

**Warbixin guud**

**S: Muxuu yahay maxay tasdiiquhu, maxayse tahay ujeedada laga leeyahay?**

J: Tasdiiquhu waa qof shahaado u heysta xaqiijinta sixiixa sarkaal dawladeed ahaan ama nootaayo dadweyne ku sameeya dukumeenti si loogu isticmaalo waddan kale. Tasdiiquhu wuxuu caddeeyaa:

- sax ahaanshaha sixiixa masu'uula idman ee saxeexay dukumintiga,
- awooda uu masuulkaas ku shaqaynayo, iyo
- marka ay habboon tahay, aqoonsiga sumada ama shaambada dukumeentigu muujinayo, tusaale ahaan, sumada nootaayada dadweynaha.
- Tasdiiquhu ma ansaxinayo xaqiiqda dukumeentiga waxa ku qoran.

**S: Maxaan ugu baahanahay tasdiiqe?**

J: Waxaad u baahan doontaa tasdiiqe haddii waddanka dukumeentiga lagu isticmaalayo uu u baahan yahay Tasdiiqe. Waa in aad ka hubisaa shuruudaha wadanka helo doona dokumintiga.

**S: Sidee loo soo saaraa tasdiiq?**

J: Tasdiiqiddu waa shahaado madow iyo caddaan ah oo shaabadaysan kuna dhejisan dukumeentigaaga.

Shahaadada tasdiiqa waxay leedahay shay la raaciyo oo ammaan ka dhigaya iyada oo la siinayo hab bogeena internetka ah si loo xaqiijiyo soo saarista shahaadada aqoonsiga ee xafiiskeena. Shahaado kasta waxay leedahay fayl lambar oo gaar ah iyo taariikhda xaqiijinta shahaadada la sameeyay. Si aad u xaqiijiso Tasdiiqid la soo saaray Maajo (May) 15, 2018, ama wixii ka dambeeyay, tag apostille.sos.state.mn.us.

**S: Miyuu Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota (Minnesota Secretary of State**) sameeyaa Tasdiiqid ama Shahaadada Xaqiijinta?

J: Laga bilaabo Maajo (May) 15, 2018, Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee Minnesota (Minnesota Secretary of State) wuxuu soo saaraa hal Tasdiiq oo loo isticmaalo dukumentiyada meel ka baxsan Mareykanka, iyada oo aan loo eegin dalka loo socdo.

**S: Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota ma bixiyaa adeegyada nootaayada?**

J: Maya. Haddii adeegyada nootaayada loo baahan yahay, waa in aad dokumentiga nootaayo ku soo sameysaa ka hor inta aadan codsigaga Tasdiiqidda u gudbin Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota.

**S: Codsigayga tasdiiqa waa degdeg, laakiin ma awoodo inaan shakhsi ahaan u imaado. Maxay yihiin waxyaalaha aan kala dooran karo?**

J: Howsha dukumintiyada waxaa loo qbtaa sida ay u soo kala horeeyaan oo ay u soo gaareen xafiiskeena.

Haddii codsigaaga Tasdiiqiddu uu yahay mid degdeg ah laakiin adiga ama qof ku matalaya uusan shakhsi ahaan u iman karin, waxaad u baahaneysaa in aad ku soo dirto dukumeentigaaga adeegyada sida FedEx, UPS, USPS, ama DHL oo isla habeennimada ah oo aadna soo raacsiisid leebalka boosta oo daabacan oo isla habeenka la geynayo ah horeyna aad u bixisay kharashkiisa si aan kuugu soo dirno dukumeentigaaga marka aan howsha qabano kadib.

*Fadlan ogow in tani aysan dedejinaynin howsha dukumintigaaga laga qabanayo. Ma dedejinayso wakhtiga ay qaadanayso in ay kugu soo gaaraan dukumintiyadaada marka howshooda la dhameeyo.

**S: Codsigayga tasdiiqa waa degdeg, laakiin ballamaha waa la wada qaatay. Maxay yihiin waxyaalaha aan kala dooran karo?**

J: Fadlan codsigaaga degdegga ah u iimayl ugu soo dir iimaylkan apostille.oss@state.mn.us.

**<u>Ballanta Shakhsi ahaaneed ee Tasdiiqidda</u>**

**S: Ma ogoshihiin in la iska yimaado (walk-ins**)?

**J:** Maya. Waxaad ballan ku qabsan kartaa **hakaan** ama ka wac xafiiskeena 651-296-2803, doorashada 2.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ballamaha aanu bixino, guji **halkaan**.

**S: Ma leedihiin musqulaha dadweynaha?**

**J:** Maya. Xafiiskeenu waxa uu ku yaalaa First National Bank Building, dhismuhuna ma laha musqulaha dadweynaha.

**S: Yaa u codsan kara tasdiiq si shakhsi ahaan ah?**

**J**: Shakhsi kasta ayaa codsan kara Tasdiiqid. Codsaduhu ma aha in uu noqdo qofka ku qoran foomka codsiga xaqiijinta ama dukumentiyada la soo gudbiyay.

**S: Sidee baan ballan u dhigtaa?**

**J:** Si aad ballan u qabsato, guji **halkaan** ama ka wac xafiiskeena 651-296-2803, doorashada 2.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ballamaha aanu bixino, guji **halkaan**.

**S: Sidee baan ballan u qabsan karaa bisha soo socota?**

**J:** Ballanta waxa la heli karaa afar iyo toban maalmood ka hor.

**S: Waxaan haystaa dukuniti ka badan 10 dukumeenti, sidee baan ballan u dhigtaa?**

**J:** Codsiyada ay la socdaan in ka badan toban dukumeenti, fadlan kala xiriir xafiiskeena si aad u samayso qaabeyn gaar ah iimaylkan **apostille.oss@state.mn.us**.

**S: Sidee baan ballan u baaqin/kansali karaa?**

**J:** Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigato ama aad baajiso ballantaada, waxaad ka samayn kartaa iimaylka 'Confirmed booking for' ee iimaylkii aad heshay  markii ballantaada la qabtay.

Haddii aad weyso iimaylkaaga xaqiijinta ah, fadlan nagala soo xiriir **apostille.oss@state.mn.us**.

**S: Baarkin ma leedihiin?**

**J:** Kala xulashada baarkinka hoos ayaa lagu qeexay:

- Ramp: Baarkinka First National Bank Building. Baarkinka albaabka laga soo galo ee Fifth Street East Waxaa jira lacag lagaa qaadayo meesha ramp ka (baabuurta la dhigto). Dhigo gaariga dabaqa koowaad oo wiishka u qaado ilaa dabaqa skyway ga. Marka aad ka soo baxdo wiishka, xafiiskeenu wuxuu ku yaalaa dhanka midig.
- Baarkinka Jidka: Waxaa jira baarkinno lacag cabiran qaata ah oo ku yaallo wadada Minnesota St.
- Tareenka (Light rail): Dhismuhu wuxuu hal baloog u jiraa khadka cagaaran ee tareenka -buskteejada(meesha tareenku istaago) Central
- Bas: Hal baloog ayuu u jiraa busteejada  2611- Minnesota St & 4th St.

<u>**Tasdiiqid lagu soo gudbiyay Boostada**</u>

**S: Waan soo diray dukumintiyadeyda; Sidee baan u eegaa xaaladooda meesha ay mareyso?**

J: Waxaad nagala soo xiriiri kartaa apostille.oss@state.mn.us ama ka wac xafiiskeena  651-296-2803, doorashada 2.

Haddii dukumintiyada lagu soo gudbiyay jeeg ama money order, fadlan sheeg lambarka jeegga iyo/ama lambarka dmoney order ka.

**S: Waxaan dukumentigayga u dirayaa waddan aan ka mid ahayn Axdiga Hague (Hague Convention)**, sidee loo xaqiijin doonaa?

J: Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota wuxuu soo saaraa hal Tasdiiq oo dukumentiyada ah oo loo isticmaalayo meel kasta ee ka baxsan Maraykanka, iyada oo aan loo eegin Axdiga Hague (Hague Convention).

Haddii aadan hubin, waa in aad la xiriirtaa Safaaradda ama Qunsuliyadda dalka aad doonayso in aad ku isticmaasho dukumeentiga si aad u ogaato waxyaaalaha aad sameyn kartid.

**Diiwaanka Muhiimka ah ee Minnesota (Minnesota Vital Records)**

**S: Sidee baan ugu heli karaa warqadda dhalashada tasdiiq?**

**J:** Haddii ay tahay shahaado dhalasho oo Minnesota ah, waxaad u baahan doontaa in aad soo dirto shahaado dhalasho oo la xaqiijiyay. Haddii shahaadada dhalashada laga soo saaray gobol kale, waxaad u baahan doontaa in aad ka hesho Tasdiiqid gobolka bixiyay.

**S: Xagee ka dalban karaa shahaado dhalasho oo Minnesota ah oo la aqoonsan yahay?**

**J:** Fadlan la xiriir **Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota**.

**S: Sidee baan ugu heli karaa warqaddeyda dhalashada "qaabka-dheer" tasdiiqid?**

**J:** Gobolka Minnesota hadda ma bixiyo shahaadooyinka dhalashada qaabka-dheer eeg **halkaan**.

Waaxda Caafimaadka ee MN waxay bixisaa shahaado dhalasho oo ansax ah, diiwaanka dhalashada oo aan la ansixin, iyo qoraalka xeerka shahaadada dhalashada oo qaabka-dheer ah.

*** Ogow: Saddexda dukuminti looma soo bandhigi karo hal dukuminti ahaan. Shahaadada dhalashada ee la ansixiyay waa in loo soo bandhigaa sidii in ay tahay hal dukuminti. Diiwaanka dhalashada ee aan la aqoonsanin iyo qoraalka siyaasadda shahaadada dhalashada qaabka-dheer waa in si sax ah loo marsiiyaa Nootaayad Dadweynaha ee Minnesota (Notary Public Minnesota) ka dibna la tasdiiqo.

**S: Halkee baan ka dalban karaa shahaado dhimasho oo ay Minnesota xaqiijisay?**

**J:** Fadlan la xiriir **Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota**.

**S: Sidee baan ku heli karaa tasdiiq shahaado dhimasho?**

**A:** Haddii ay tahay shahaadada dhimashada ee Minnesota, waxaad u baahan doontaa in aad soo dirto shahaado dhimasho oo ansax ah. Haddii shahaadada dhimashada laga soo saaray gobol kale, waxaad u baahan doontaa in aad la xiriirto gobolka bixiyay shahaadada.

**S: Sidee baan ku heli karaa tasdiiqa Shahaadada Guurka?**

**J:** Waxaad u baahan doontaa in aad soo dirto shahaadada guur ka ee Minnesota oo ansax ah. Haddii aadan haysan koobi la ansixiyay, waxaad mid ka dalban kartaa degmada laga xareeyay shahaadada.

Fadlan la xiriir **Shahaadooyinka Guurka**.

**S: Waxaan haystaa shahaado guurka Minnesota ee sharaxaada iyo xusuusta ah; shahaadadaas u diri karaa in la soo tasdiiqo?**

**J:**Maya, tasdiiq waxaa kaliya oo lagu sameyn karaa shahaado guur oo Minnesota ah oo la aqoonsan yahay. Waxaad u baahan doontaa in aad soo dirto shahaado guur oo Minnesota ansax ka ah. Haddii aadan haysan koobi la ansixiyay, waxaad mid ka dalban kartaa degmada laga xareeyay shahaadada.

Fadlan la xiriir **Shahaadooyinka Guurka**.

**S: Xoghayaha Arimaha Dibada ee Gobolka Minnesota ma bixiyaa adeegyada tarjumaada shahaadooyinkaan uu gobolku bixiyay (tusaale, shahaadada dhalashada/dhimashada/guurka)?**

**J:** Maya. Haddii turjumaad loo baahan yahay, waa in aad adeegan ka raadisaa meel ka baxsan xafiiskeena.

**S: Sidee baan ku heli karaa warqadda dhalashada/dhimashada/guurka oo la turjumay?**

**A:** Dokumintiga la turjumay waa in uu si sax ah uga nootaayeysan yahay nootaayada Ddadwaynaha ee Minnesota. Nootaayadu waa in ay ahaato af Ingiriisi si xafiiskeenu u saaro tasdiiq warqadda dukumeentiga ah ee la turjumay. Dukumintiga intiisa kale waxay ahaan karaan luqad kale.

FIIRO GAAR AH: Dukumeentiyada la turjumay si gooni ah ayaa loo tasdiiqaa. Tusaale ahaan, shahaado dhalasho oo MN ah iyo  shahaado dhalasho oo si sax loo nootaayey loona turjumay looma isticmaali karo sidii in ay yihiin hal dukumenti oo kale; Dukumentiyada waxaa loola dhaqmi doonaa sidii in ay yihiin laba dukuminti oo kal duwan oo kale dukumeenti kasta wuxuu lahaan doonaa shahaado tasdiiq ah oo u gaar ah.

**S: Halkee baan ka heli karaa warqad sheegeysa Xaalad Doobnimo** (**Single Status**)? Sidee baan ku heli karaa tasdiiqid warqad sheegeysa Xaalad D**oobnimo** (**Single Status)**?

**J:** Warqadda cadeynta Xaalad Doobnimo/ Dhaarta Doobnimada oo sida badan loo yaqaan Shahaadada Diiwaanka Guur La'aanta. Kuwaan waxaa sida guud ahaaneed laga heli karaa degmadaada. Haddii kale, waxaad ka heli kartaa tusaaleyaal onlayn ah oo ah warqadaha caddaynta xaaladda doobnimada oo aad buuxin karto oo aad nootiyada geyn karto Nootaayaha Dadweynaha ee MN si laguugu nootaayeeyo.

*Fadlan ogoow haddii aad hesho Xaqiijinta Diiwaanka Guurka La'aanta ee aad gaar ahaan ka hesho Degmada Hennepin, degmadani waxay xaqiijisay in aysan caddayneynin nooca dukumintiga. Sidaa darteed, waxay u baahan doontaa in si sax ah looga caddeeyo Nootaayada Dadweynaha Minnesota horteeda ka hor inta aan la tasdiiqin.

**Baarista Raadraaca ah/Diiwaanka Taariikhda Dambiyada (Background Checks/Criminal History Record)**

**S: Sidee baan ku heli karaa tasdiiqid ee ku saabsan Hubinta Baadraaca ee Gobolka Minnesota/Diiwaanka Dambiyada (Minnesota State Background Check/Criminal History Record**)?

**A:** Waxaad u baahan doontaa in aad ka hesho warqad nootaayo ah oo ka socota Xafiiska Soo Qabashada Dambiilayaasha (Bureau of Criminal Apprehension). Wixii macluumaad dheeraadda ah oo ku saabsan baarista raadraaca ah, fadlan booqo **Boga internete ee Xafiiska Soo Qabashada Dambiilayaasha (Bureau of Criminal Apprehension website)**.

**S: Sideen ku heli karaa apostille ee Baarista Raadraaca ee FBI (FBI Background Check)?**

**J:** Baaritaannada Raadraaca ah ee FBI da waa in loo diraa Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka ee Washington DC. Xafiiskeenu awood uma laha inuu Tasdiiqo baarista raadraaca taariikheed ee federaalka ah. Waxaad booqan kartaa barta internetka ee **Waaxda Arrimaha Dibedda Mareykanka (US Department of State)** wixii macluumaad dheeraad ah.

**Dukumintiyada Iskuulada Minnesota**

**S: Miyey taranskiribtigeyga dugsi sare oo Minnesota ah u baahan yahay in la nootaayo?**

**J:** Taranskiribtiyada dugsiga sare waa in si sax ah looga sooo nootaayeeyaa Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota.

**S: Miyey shahaadada dugsi sare oo Minnesota ah u baahan yahay in la nootaayo?**

**J:** Dibloomooyinka (asalka ah ama koobiga ah) waa in ay si sax ah looga soo nootaayeeyaa Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota.

Ogow: Waa inaad ka hubsataa wadanka loo dirayo si aad u go'aamiso in dibloomadu ay tahay mid asal ah ama haddii koobi la aqbali karo.

**S: Miyey taranskibtiyada kulliyadaydaha ama Jaamacadaha Minnesota u baahan yihiin in la nootaayo?**

**J:** Taranskiribtiyada kuliyadaha/jaamacada waa in ay si sax ah nootaayeeyaan Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota.

**S: Miyey shahaadooyinka kulliyadaydaha ama Jaamacadaha Minnesota u baahan yihiin in la nootaayo?**

**J:** Dibloomooyinka (asalka ah ama koobiga ah) ee kuliyadaha/jaamacada waa in si sax ah looga soo nootaayeeyaa Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota

Ogow: Waa inaad ka hubsataa wadanka loo dirayo si aad u go'aamiso in dibloomadu ay tahay mid asal ah ama haddii koobi la aqbali karo.

**S: Sidee baan ku heli karaa tasdiiqidda dukumintiyada Iskuul ka baxsan gobolka?**

**J:**Waxaad u baahan doontaa in aad la xiriirto gobalka soo saaraya si aad u ogaato habraacooda tasdiiqa/xaqiijinta.

**<u>Laysanka Darawalnimada/Aqoonsiga</u>**

**S: Sidee baan u tasdiiqaa leysinka darawalnimada/kaarka aqoonsiga?**

**J:** Waxaad u baahan doontaa in aad hesho koobiga laysanka darawalnimada ee Minnesota / kaarka aqoonsiga oo uu nootaaysiiyay nuqul sax ah oo uu qoray Nootayada Dadweynah ee Minnesota. Fadlan ha noo soo dirin laysankaaga darawalnimada/kaarka aqoonsiga ee asalka ah.

**S: Sidee baan u tasdiiqaa Baasaboorkayga?**

**J:** Waxaad u baahan doontaa in aad hesho nuqul ka mid ah baasaboorkaaga oo nootaayeysan inuu yahay nuqul sax ah oo ay soo saartay Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota. Fadlan ha noo soo dirin baasaboorkaaga asalka ah.

**<u>Dukumentiyada La Nootaayeeyay</u>**

**S: Sidee baan tasdiiq ugu heli karaa dukumintiyadeyda shakhsi ahaaneed (Tusaaleyaal: Siinta Awoodda Qareenka [Power of Attorney]**, Dhaaraha [**Affidavits]**, Oggolaanshaha [**Consents]**, iwm.)?

**J:** Waxaad u baahan doontaa in  dukumeentigaaga gaarka ah uu si sax ah u nootaayeeyo Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota.

**S: Sidee baan ku ogaan karaa in dukumeentigeyga si sax ah loo nootaayeeyay?**

**J:** Marka loo eego xeerka MS 358.65, Nootaayada Dadweynaha ee Minnesota waa in ay sheegaan waxyaabahan soo socda marka ay nootaayeynayaan dukuminti:

- goobta xukunku saameeyo (tusaale, Gobolka Minnesota, Degmada Ramsey)
- oraahda/hadalka qirashada ah
- cinwaanka (tusaale, Nootaayada Dadweynaha)
- taariikhda nootaayeynta
- saxiix asalka ah ee qoyan
- shaabada nootaayada

**Ka eeg boga Noocyada Dukumintiyada si aad u hesho qaabab badan oo gaar ah.**

**S: Miyuu Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota soo saari karaa Tasdiiqid dukumeenti ku qoran luqad aan Ingiriisi ahayn?**

**J:** Haa. Haddii dukumintiga nootaayada saaran uu ku qoran yahay Ingiriis, Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota Tasdiiw wuu soo saari karaa. Dukumintiga intiisa kale waxay ahaan karaan luqad kale.

**S: Xafiiskiinu ma ii nootaayeyn  karaa dukumeentigeyga?**

**J:** Xafiiska Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota ma bixiyo adeegyada nootaayeynta. Si aad u raadiso nootayada dadweynaha ee Minnesota, guji **halkaan**.

**S: Ma aqbashaan nootaayooyinka remote ka ah (**fog) ama elegtaroonig ah?

**J:**Maya. Xoghayaha Arimaha Dibada ee Minnesota wuxuu uu u arkaa dukumeenti daabacan oo nootaayo lagu saxeexay si elektaroonig ah oo ay si elektaroonig ah u saxeexday Nootaayada Dadmeynaha ee Minnesota nuqul/koobi ka mid ah dukumeentigii asalka ahaa, sidaa darteed nuqulku maaha dukumeenti dadweyne oo wuxuu u baahan doonaa in si habboon loo soo marsiiyo nootaayo kahor inta aan tasdiiq la soo saarin.

**Diiwaanada Shirkadaha Ganacsiga Minnesota**

**S: Sidee baan u tasdiiqi karaa  dukumintiyadeyda goobta ganacsiga ee Minnesota?**

**J:** Haddii shirkad ganacsi Minnesota ah uu ka diiwaangashan yahay xafiiskeena waa in aad ka dalbataa nuqul/koobi shahaadeysan. Waxaa jira laba siyaalood oo hoos lagu tilmaamay:

- Doorashada 1: Si toos ah onlayn uga dalbo nuqullada shahaadaysan. Tilmaamuhu waa **halkaan**.

Nuqullo shahaado leh ayaa iimayl ahaan laguugu soo diri doonaa. Marka la helo kadib, waa in aad daabacdaa dhammaan feylasha iyo boggaga la shahaadiyay (Certification of Record) oo aad boostada ugu soo dirtaa xafiiskeena adiga oo isticmaalaya foomkan **Foomka Codsi Xaqiijinta (Authentication Request Form)** iyada oo ay la socoto  khidmadaha tasdiiqidda ee ku habboon.

- Doorashada 2: Buuxi foomamka **Foomka Codsiga Nuqulka Ganacsiga (Business Copy Request Form)** iyo **Foomka Codsi Xaqiijinta** oo usoo dir foomamka xafiiskeena iyada oo ay la socdaan nuqulka ku habboon iyo khidmadaha tasdiiqidda.

**S: Sidee baan u tasdiiqaa Shahaadada Ganacsi Wanaaga/Shahaadada Jiritaanka?**

**J:** Haddii ganacsiyada Minnesota ee ka diiwaan gashan xafiiskeena ay tahay mid Shaqenaya (Active) oo ku Sugan Xaalad Wanaagsan (Good Standing), waxaa jira laba ikhtiyaar oo hoos lagu qeexay:

- Ikhtaarka (Qaabka) 1: Si toos ah online uga dalbo Shahaadada Ku Sugnaanta Xaalad Wanaagsan/Shahaadada Jiritaanka. Tilmaamuhu waa **halkaan)**.

Shahaadada iimayl ahaan ayaa laguugu soo diri doonaa. Marka la helo kadib, waa in aad daabacdaa shahaadada oo aad u soo dirtaa xafiiskeena iyada oo ay la socoto **Foomka Codsi Xaqiijinta)** iyo kharashyada ku habboon ee tasdiiqa.

- Doorashada 2: Buuxi foomamka **Foomka Codsiga Nuqulka Ganacsiga** iyo **Foomka Codsi Xaqiijinta** oo usoo dir foomamka xafiiskeena iyada oo ay la socdaan shahaado sax ah iyo khidmadaha tasdiiqidda.